REAL LEARNING FOR REAL LIFE

# Su’aalaha Badanaa la Iswaydiiyo: Ku imtixaanidda Smarter Balanced

**Sidee imtixaanada gobolka Washington iskugu beddeli doonaan Heerarka Cusub ee Waxbarashada K-12 ee Gobolka Washington ee farshaxanka luuqadda Ingiriiska iyo xisaabta?**
2011, Washington waxay hirgalisay heerar waxbarasho cusub oo farshaxannada luuqadda Ingiriiska iyo xisaabta (oo loo yaqaano Heerarka Gobolka ee Common Core). Sannad dugsiyeedka 2014-2015 waa markii u horraysay ee heerarka cusub la baro dhammaan ardayda. Imtixaanada loogu talogalay in lagu cabbiro sida ardaydu u yaqaanaan heerarka waxa loo yaqaan qiimaynaha Smarter Balanced. Imtixanadaan waxa laga qaadi doonaa dhammaan ardayda fasallada 3-8 iyo 11 laga bilaabo 2014-2015. Waxay beddeleen imtixaanada Cabbiraadda Horumarka Ardayga ee akhriska, qorista iyo xisaabta fasallada 3-8, iyo sidoo kale Imtixaanada Xariifnimada Dugsiga Sare ee akhriska iyo qorista.

**Imtixaanadee ayey ardaygu gali doonaan sannad dugsiyeedkan (gu’ga 2015)?**
Sannad dugsiyeedka 2014-2015:

- Ardayda fasallada 3-8 waxay gali doonaan imtixaanada Smarter Balanced ee farshaxannada luuqadda Ingiriiska iyo xisaabta.
- Ardayda fasallada 5 iyo 8 sidoo kale waxay gali doonaan sayniska MSP.
- Ardayda fasalka 11 waxay gali doonaan imtixaanada Smarter Balanced ee farshaxannada luuqadda Ingiriiska iyo xisaabta.
- Ardayda fasalka 10 waxay gali doonaan imtixaanada Smarter Balanced ee farshaxanada luuqadda Ingiriiska si ay u oofiyaan shuruudaha qalinjabintooda ELA. Ardayda fasalka tobnaad sidoo kale waxay gali doonaan imtixaanada dhammaadka koorsada ee xisaab iyo bay’oolaji ilaa ay hore u oofiyeen shuruudaha qalinjabinta qiimaynta xisaabta iyo/ama bay’oolajiga intii ay kujireen fasal hore. Ardayda waxaa laga rabaa inay ka gudbaan hal imtixaanka xisaabta gobolka ah iyo imtixaanka bay’oolajiga si ay u mutaystaan qalinjabinta.

**Maxaynu uga baahannahay imtixaanada la caadiyeeyey sida Smarter Balanced ama imtixaanadeena kale ee gobolka?**
Imtixaanada la caadiyeeyey waxay waafaqsan yihiin waxa ardaydu ay ku dhigtaan fasalka. Waalidiinta iyo macalimiintu waxay ku jecel yihiin imtixaanadan inuu yahay cabbiraado madaxbannaan oo caddaalad ah ee sida ardaydu wax u wadaan. Buundooyinka imtixaan ee waadax ah lana fahmi karo waxay ka caawiyaan macalimiinta iyo waalidiintu inay ka wada shaqeeyaan inay isku hagaajiyaan qaabkooda waajihidda si fiicanna u buuxiyaan baahiyaha ardayda. Imtixaanada la caadiyeeyey sidoo kale waxay siiyaan qaar kamid ah xogaha waxbarashada kuwaasi oonu u isticmaalno go’aaminta, tusaale ahaan, waxa shaqaynaya waxbarashada gaarka ah, ama haddii gal-daloolada kasbashada kusalaysan qoomiyada ama dabaqaddu ay sii jiraan. Shuruucda gobolka iyo dawladda dhexe labaduba sidoo kale waxay ruqsad u siiyeen in dhammaan dugsiyadu isticmaalaan cabbir guud marka la eego maddooyinkan dhawrka ah si loogula xisaabtamo dugsiga iyo degmada.

**Miyey imtixaanada cusub ee Smarter Balancedka adag ka yihiin imtixaanadayada wakhtigan ee gobolka?**

Haa, laakiin waxa ugu wacan inay waafaqsan yihiin istaandarrada barasho ee ka adag ee cusub (Heerka Gobolka ee Common Core), kuwaasi oo loogu talogalay inay si fiican ugu diyaariyaan ardayda kuuliyadda iyo/ama shaqooyinka marka ay qalinjabiyaan. Imtixaankeena gobolka ee wakhtigan wuxuu cabbiraa xirfadaha aasaasiga ah.

**Miyey tirada ardayda buuxinaysa heerku ka hoosayn doonaan imtixaanada cusub ee Smarter Balanced marka loo eego imtixaanadayada gobolka ee wakhtigaan?**

Ma aha tufaax-tufaax barbardhig. Waxa jira heerar barasho iyo imtixaano cusub, markaa waa inaan la isbarbardhigin buundooyinka cusub iyo kuwii hore. Maadaama Heerarka Gobolka Common Core ay aad uga adag yihiin kii hore ee heerarka waxbarashada gobolka, buundooyinka imtixaanka ardaydu waxa dhici karta inuu ka hooseeya inta hor waxa ardayda, waalidiinta iyo macalimiintu ay hore u arki jireen. Imtixaanada Smarter Balanced waxay u dhigayaan qiyaas cusub waxqabadka ardayda, isagoo cabbiraya xirfadaha iyo aqoonta ardaydu ay u baahan yihiin si ay u guulaystaan kadib dugsiga sare, oo ay kujiraan dhib-xallinta, qoraalka iyo fekerka dhabta ah.

**Maxaa ka dhigaya imtixaanada Smarter Balanced qaar ka fiican imtixaanadayada gobolka ee wakhtigan?**

Imtixaanada Smarter Balanced cusub waxay waafaqsan yihiin heerarka waxbarashada cusub. Waxa kamid ah su'aal dooro midda saxda ah iyo hawlaha waxqabad oo loogu talogalay in lagu cabbiro xirfadaha sida cilmi-baarista, dhagaysiga, iyo sababaynta xidhiidhka. Imtixaanadu waxay u baahan yihiin ardaydu inay ku dabbaqaan aqoontooda dhibaatooyinka dhabta waxna u qoraan si qancin leh. Imtixaanadu waa qaar "Kombiyuutar kusalaysan," sidaa darteed kombiyuutarku si otomaatig ah isagaa iskugu hagaajinaya adkaanshaha su'aalaha marka ardaygu imtixaanka kujiro. Qaybo ka mid ah imtixaanada waxa saxa saxayayaal qaybo kalena mishiin ayaa saxa sidaa darteed natiijadu waxay u soo bixi doontaa si ka dhakhso badan sidii hore. Maadaama qiimaynuhu ay fiican yihiin, nadiijadana si dhakhso ah loo helayo, macalimiinta iyo waalidiintu waxay u isticmaali karaan natiijooyin inay caawiyaan ardayda.

Imtixaanada cusub Smarter Balanced waxa:

- Isticmaalaya in ka badan 20 gobol. Dhammaan gobolada (iyo hal dhulka qaaradda ka baxsan) ee isticmaalaya imtixaanada Smarter Balanced waxay ku heshiiyeen in la isticmaalo buundooyin la wadaago ee tabinta waxqabadka ardayga. Taasi waxay ka dhigan tahay in waxqabadka ardayga si dhab ah loo barbardhigi karo dhamaanba fasalada gobolada oo dhan.
- Waa wax cusub, oo leh waafajino Bartayaasha Luuqadda Ingiriiska iyo ardayda leh naafada kaasi oo ka dhigay imtixaanada qaar la heli karo iyada oon gorgortan laga galin waxa loogu talogalay inay cabbiraan.
- Waxa soosaaray gobollo, waxaana loo soosaaray gobollo. Barigii hore, qiimaynaha waxa loo soosaari jiray gobol kasta gaarkiisa; isku darista khayraadku wuxuu yareeyaa kharashka barnaamijkeena qiimaynta. Macalimiinta gobolka Washington waxay ku lug leeyihiin tallaabo kasta habka nashqadda: http://www.k12.wa.us/SMARTER/DigitalLibrary.aspx
- Tayo fiican. Saddex daraasadood oo madaxbannaan ayaa lagu ogaaday imtixaanada cusub inay ka heer sarreeyaan imtixaanada gobolka ee wakhtigaan marka la eego cabbirka waxbarashada qotoda dheer iyo xirfadaha heerka sare.

Gal imtixaan tijaabo ah oo adiguna arag. Waa tan barta laga helayaa: http://www.smarterbalanced.org/pilot-test.